



## (Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa

Caa'isha oo ahayd xaaskii Nabiga scw waxay ka warisay Nabiga scw inuu yiri: (Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey in jileeca iyo dabac sanaata xaga hadalka iyo ficilkuba ay u siyaadiso qurux arimaha, kamaal, iyo wanaag waxayna u dhawdahay in qofka sidaa suubiya uu dantiis gaaro. Dabacsaan la`aantu arimaha way ceebaysaa oo xumaysaa waxayna u diidaa qofka sameeya inuusan dantiisa gaarin ama uu ku gaaro dhib.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5796>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

